Ayeeyaasha ama Awoowayaasha iyo Qaraabada

Ma garanaysaa waxa kusaabsan adeegaha taageerooyinka loogu talogalay adiga iyo carruurta aad daryeeshid?

Washington State
Department of Social
& Health Services
Transforming lives

Waxaa jira wax ka baddan 43,000 ayeeyooyin ama awoowayaal iyo qaraabo kale oo ku korinaya carruurtooda gobolka Washington. Hoos waxaa ku qoran xogag kala duwan, dheefo, iyo adeego taageero oo aad ka heli karto tooska Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo wakaalado kale oo ah kuwo gaar ah iyo kuwo dadweyne.

Xogag Guud iyo Gobolka oo dhan ah

- **Dammaanada Bulshada** - macluumaad kusaabsan Dammaanada Bulshada Hawl gabka iyo dheefaha Naafonimada, Lambarada Dammaanada Bulshada, iyo mowduucyo xiriir la leh:

  Teleefoon: 1-800-772-1213 (TTY 1-800-325-0778)
  Bogga internetka: www.ssa.gov

- **Xarunta Xakamaynta Sunta Washington (WAPC)** waxay bixisaa talo daaweyn dad khibrad leh oo dhakhso, bilaash ah, oo 24/7 saacadood iyo todobo maalin ah, iyo caawimaad tooska teleefoonka ah xaalada ay dhacdo jiro. Dhammaan wicitaanadu waa kuwo sir ah:

  Teleefoon: 1-800-222-1222
  Bogga internetka: www.wapc.org

- **Qaraabonimo Hagid** waa dukaan halmar-istaagid ah oo bixinaya macluumaad iyo caawimaad lagu siiyo qaraabada aanan garanaynin halka laga codsado dheefaha iyo adeegaha bulshadooda dhexdooda. Hagayaasha Qaraabonimada waxay ka shaqeeyaan inbaddan oo gobolka ka mid ah. Hagayaasha Qabiileed waxay u adeegaan Qabiilada la doortay:

  Teleefoon: 1-800-422-3263 ama 360-725-2556
  Bogga internetka: www.dshs.wa.gov/altsa/kinship-care-support-services.

- **Kooxaha taageerada degmada ee loogu talogalay qaraabada korinaya carruur:**

  Teleefoon: 1-800-422-3263 ama 360-725-2556
  Bogga internetka: www.dshs.wa.gov/kinshipcare (ku dhufo dusha "…Support Groups" "…Kooxaha Taageerada" kadibna dooro degmadaada ama magaalada)

- **Khadka marwalba shaqeeya** wuxuu bixiyaa macluumaad iyo wareejino kusaabsan adeego baddan oo caafimaad iyo bulsho ah oo xiriir la leh korinta carruurta ah dhammaan da'ooyinka ay kujiraan caymiska caafimaadka, nafaqo, talaalid, daryeel caafimaad, horumarin ilmo, iyo carruurta qabba baahooyin gaar ah:

  Teleefoon: 1-800-322-2588 (TTY 711)
  Bogga internetka: www.parenthelp123.org (Qoysaska waxay ka heli karaan oona ka codsan karaan barnaamijyada ayaga oo isticmaala raadiyaha dheefta)

Melena Da'deedu tahay 6. Tartanka Codadka Carruurta 2016.

- **Xiriirka Washington** bogg internet oo bixinaya macluumaad iyo caawimaad lagu caawiyo codsashada adeegaha Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada, ay ku jiraan deeqaha TANF iyo caawimaada cuntada:

  Bogga internetka: www.washingtonconnection.org

- **Isbahaysiga Nolol Wanaaga Ilmaha** wuxuu bixiyaa fasalo tababar oo bilaash ah oo loogu talogalay dhammaan qaraabada iyo waalidiinta korinta ama xanaanada. Fasaladu inta baddan waxay dhacaan habbeenada todobaadka iyo dhammaadka todobaadka sidoo kale waxaa la helayaa tababaro tooska-khadka ah.

  Bogga internetka: https://allianceforchildwelfare.org/resources

- **Maamulka Carruurta Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada:** macluumaad kusaabsan daryeelka xigtada, daryeelka korinta iyo nidaamka nolol wanaaga ilmaha:

  Bogga internetka: www.dshs.wa.gov/CA/fos/relatives-caring-for-kids

- **Mashruuca Cadaalada Waqooyi Galbeed (NJP)** wuxuu leeyahay macluumaad caawimaad-nafta ah oo bilaash ah ay ku jiraan bogg internetka iyo khad marwalba shaqeeya oo teleefoon-bilaash ah. Mashruuca Cadaalada Waqooyi Galbeed wuxuu isku duway barnaamij Waxbarasho Sharci ah, Talo, iyo Wareejin (CLEAR) oo bixinaya caawimaad sharci bilaash ah oo lagu caawinayo mushkiladaha sharciga rayidka ee loogu talogalay dadka u qalma dakhli-jaban.

  Teleefoon: 1-888-201-1014 - haddii aad tahay qof ka yar 60 sanno oona haysatid dakhli-jaban. Dadka degan Degmada King waa in ay wacaan lambarkan 206-464-1519. Haddii aad tahay qof ka wayn 60 sanno oona haysatid dakhli heer kasta oo uu yahay wac lambarkan 1-888-387-7111.

- **Caawimaada Sharciga Washington** wuxuu bixiyaa adeego sharci bilaash ah oo loogu talogalay dadka haysta dakhli-jaban iyo dadka waawayn ee jooga Washington. Bogga internetka wuxuu bixinayaa qalab waxbarasho sharciyaysan iyo alaabo bixinaya macluumaad aasaasi ah oo kusaabsan mushkiladaha sharciyeed iyo tilmaamo faah-faahsan iyo foomam kugu caawinaya in aad nafsadaada ku matashid maxkamad. Sidoo kale waxaad meelayn kartaa macluumaadka kusaabsan barnaamijyada gargaarka sharciga bilaashka ah, u qalmida aasaasiga ah, iyo macluumaadka xiriirka.

  Bogga internetka: www.washingtonlawhelp.org

Sawirada waxay ka ahaadeen Codadka Carruura sannadlaha ah ee Carruurta Korsaday Ayeeyaashooda ama Awoowayaashooda iyo Tartan Qaraabo Kale
Wada-maalgelin ka ahaatay dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada lagana Agaasimay dhinaca Waxbarashada Qoyska iyo Adeegaha Taageerada

Adiga iyo ilmaha aad daryeeshid waxaad u qalmi kartaan...

Caawimaad Maaliyadeed

- **TANF (Caawimaada Ku meel gaarka ah ee loogu talogalay Qoysaska Saboolka ah) deeqda-kaliya ilmaha:** Deeqo lacag caddaan ah oo bilo ah ayay heli karaan qaraabada ah kuwa ayaga sida aasaasiga ahi u daryeela carruurta ka korinayo. Dhammaan dakhliga ilmaha iyo daryeel bixiyaha waa kuwo la tixgeliyo, laakiin kaliya tirada xogaga ilmaha ayaa xadidaysa u qalmida (dakhliga daryeel bixiyaha ma ahan mid la tixgelinayo haddii ilmaha la geliyo wakaalad nolol wanaag kiiskuna uu furanyahay). Daryeel bixiyayaasha waxay sidoo kale u qalmi karaan deeqda TANF ee ayaga loogu talogalay haddii ay kasoo baxaan shardiga u qalmida. Dadka hela kaliya TANF-ilmaha waxay ka qaadan karaan lacag bixino caddaan ah oo hal-mar ah oo dheeraad ah ee loogu talogalay in loogu caawiyo guri helida deg-dega ah ama baahooyinka qalabka guriga tasiilaadka tooska barnaamijka Shuruudaha Dheeraadka ah ee loogu talogalay Baahooyinka Deg-dega ah (AREN) Weydii Xafiiskaaga Adeega Bulshada ee degmadaada kuyaala waxyaabaha kusaabsan lacagahaan.

  Teleefoon: 1-877-501-2233 si aad u heshid Xafiiskaaga Adeega Bulshada ee degmadaada kuyaala
  Bogga internetka: www.dshs.wa.gov/esa/esa-find-office
  Si aad u oggaatid haddii aad u qalantid una codsatid caawimaad, gal boggaan internetka www.washingtonconnection.org

- **Barnaamijka Taageerada Daryeel bixiyayaasha Xigtada (KCSP):** Lacagaha muddada-dheer waxaa la siinayaa qaraabada aan carruurtooda ku lug lahayn nidaamka nolol wanaaga ilmaha si loogu caawiyo in ay bixiyaan baahooyinka aasaasiga ah (cunto, guri, dhar, waxyaabaha iskuulka, iwm.). Siddee loo codsanayaa:

  Teleefoon: Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida lambarkan 1-800-422-3263 ama 360-725-2556 si aad u heshid meesha uu kuyaalo xafiiska degmada KCSP
  Bogga internetka: www.dshs.wa.gov/altsa/hcs/kinship-care/benefits (ku dhufo dusha Financial Help "Caawimaada Dhaqaalaha")

- **Lacagaha Adeega Taageerada Qaraabada** waxay bixiyaan lacago xaalad deg-dega ah oo muddo-gaaban ah midaas oo la siiyo qaraabada aan rukhsada haysanin iyo daryeel bixiyayaal kale oo la oggolaaday oo haysta ilmo gobolka-ku tiirsan (carruurta gobolka-kutiirsan waxay kujiraan xanaanada sharciga gobolka, waxayna haystaan kiis furan oo Maamulka Carruurta ah iyo shaqaale bulshadeed oo loo xilsaaray). Lacagaha waxaa lagu bixin karaa alaabta guriga la dhigo, dharka, gaaska, dhigaalada, waxyaabaha iskuulka, iwm. La xiriir shaqaalaha bulshada ilmaha si aad u heshid lacagahaan ama macluumaad dheeri ah. Waalidiinta xanaanada ma ahan kuwo u qalma.



Amaris, Da'deedu tahay 17. Tartanka Codadka Carruurta 2016.

Daryeelka Caafimaadka

- **Caymiska Caafimaadka loogu talogalay carruurta ku jira daryeelka xigtooyo ama qaraabonimo:** Carruurta ku nool daryeel bixiyaha qaraabada ah waxaa dhici karta in uu u qalmo caymis kujirid Washington Apple Health bilaash ah. Codsiga waa in si toos ah looga xareeyo internetka ama in la waco xarunta adeega macamiilka. Daryeel bixiyayaasha waxay sidoo kale u qalmi karaan caymis kujirid caafimaad qiimo-jaban ama bilaash ah ee ayaga loogu talogalay isla markaasna u codsadaan ilmaha daryeelkooda kujira.

  Teleefoon: 1-855-923-4633
  Bogga internetka: www.wahealthplanfinder.org

- **Caymiska Caafimaadka carruurta ku jira daryeelka korinta:** Carruurta ku tiirsan gobolka waxay si ootamaatik ah ugu qalmaan Washington Apple Health mana u baahana wax codsi ah. Maamulka Carruurta wuxuu si toos ah ugu soo sheegayaa ilmaha daryeelka ku jira Maamulka Daryeelka Caafimaadka.

- **Xiriirada Aasaasiga ah ee Apple Health (AHCC)** cinwaanada uu u baahanyahay daryeelka caafimaadka ee carruurta kutiirsan-gobolka ee degan meel-ka-baxsan guriga. Xiriirada Aasaasiga ah ee Apple Health wuxuu kugu caawinayaa in aad aqoonsatid nooca adeegaha iyo daryeel bixiyayaasha uu u baahanyahay ilmahaaga, mushkiladaha caafimaad ee hore ee carruurta wakhtiga dhow la geliyay daryeelka, jawaabta su'aalaha ku saabsan mushkiladaha caafimaadka carruurta, iyo in laguugu caawiyo raadinta Washington Apple Health iyo nidaamka daryeelka caafimaadka ugu fiican. Carruurtu waxay u qalmaan Xiriirka Aasaasiga ah ee Apple Health haddii ay yihiin kuwo ka yar da'da 21 sanno oona laga meeleeyay tooska ku tiirsanaan gobol ama qabiil. Wixii ku saabsan macluumaad dheeri ah, la xiriir shaqaalaha bulshada ilmahaaga ama:

  Teleefoon: 1-844-354-9876

- **Astaanta Ilmaha Horumarinta Caafimaadka** waxyaabo loogu talogalay carruurta da'doodu tahay dhallashada illaa lix sanno ayaa la helayaa. Macluumaadka waa da'-xadidan waxaana kamid ah tallaalo, korid, kobcid, ammaan, nafaqo, iyo arimo waalidnimo kale.

  Teleefoon: 1-866-397-0337
  Bogga internetka: www.childprofile.org

- **Hadal Cad oo Kusaabsan Tallaalida Ilmonimo** (Waaxda Qoraalada daabacan ee Caafimaadka #348-080): macluumaad faah-faahsan oo lagu caawinayo waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha in loogu wargeliyo qaraarada kusaabsan tallaalida carruurtooda. Si aad u dalbatid buuggyarahaan iyo waxyaabo kale oo tallaal oo bilaash ah:

  Teleefoon: 1-866-397-0337
  Bogga internetka: http://here.doh.wa.gov/materials/plaintalk

- **Xarumaha Caafimaadka kuwaas oo oggolaada caymiska Washington Apple Health** ee loogu talogalay daryeel caafimaad iyo mid ilko:

  Teleefoon: 1-800-562-3022
  Bogga internetka: https://fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/Daryeel bixiyayaasha waa in ay la xiriiraan daryeel bixiyaha si ay u oggaadaan haddii ay aqbalayaan bukaanada cusub ee Apple Health.

- **Oggolaanshaha La wargeliyay ee loogu talogalay Daryeelka Caafimaadka** - Sharciga gobolka wuxuu u oggolaanayaa daryeel bixiyayaasha qaraabada ah in ay bixiyaan oggolaansho la wargeliyay ee loogu talogalay daryeelka caafimaadka ilmaha ku jira daryeelkooda (uu ku jiro daryeelka caafimaadka maskaxda iyo ilkaha) xitaa haddii aysan haysanin amar maxkamad. Marka ilmo lagu daryeelayo xanaanada gobolka, waxaa khasab kugu ah in aad la hadashid shaqaalaha bulshada si aad u fahantid daryeelka caafimaadka ay khasab tahay in ay maxkamadu oggolaato. Wixii kusaabsan macluumaad baddan, fiiri hoosta "Free Publications" "Qoraalada daabacada Bilaashka ah" halkaas oo aad ka dejisan karto qoraalka, *Oggolaanshaha Daryeelka Caafimaadka ee loogu talogalay Ilmaha aad Adigu Daryeeshid: Haggaha Daryeel bixiyaha Xigtada ah.*

  Teleefoon: 1-800-422-3263 ama 360-725-2556 si aad u heshid nuqul kusaabsan qoraalka oggolaanshaha la wargeliyay.
  Bogga internetka: www.washingtonlawhelp.org/issues/family-law/non-parents-caring-for-children

Adeegaha Ilkaha

- **Meelaynta Daryeelka Ilkaha loogu talogalay Carruurta iyo Dadka waawayn:**

  Bogga internetka: www.theMightyMouth.org liisas kusaabsan xarumaha caafimaadka ilkaha bulshada ee qiimaha-jaban ee degmada
  Teleefoon: 2-1-1 Shabakada Macluumaadka Washington (WIN) ee ka ahaata meel kasta oo Washington ah si ay ula hadlaan Takhasusleh Wareejin iyo Macluumaad ee loogu talogalay caawimaad lagu oggaanayo xiriirada teleefoon ee xarun ilko degmada ah (waxaa la helayaa turjubaano)
  Bogga internetka: Waaxda Caafimaadka WA ee loogu talogalay xogag kale oo caafimaad ilkaha ah: www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/OralHealth/FindingDentalCare

- **Xarunta Caafimaadka Ilkaha Carruurta (CPD)**, wada shaqayn ka dhaxeeya Jaamacada Washington iyo Isbitaalka Carruurta Seattle, waxayna bixiyaan daryeel buuxa oo ilko ah oona gaar ah oo la siiyo carruurta dhammaan da'ooyinka oo dhan ah, ay kujiraan carruurta qabba baahooyin gaar ah. Apple Health la aqbalay.

  Teleefoon: 206-543-5800
  Bogga internetka: www.thecenterforpediatricdentistry.com

Caawimaada Caafimaadka Maskaxda ah iyo Xanuunada Isticmaalka Daroogada

- Si aad u heshid adeegaha degmada iyo wakaaladaha u adeega carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaska lagu qoray caymiska Apple Health:

  Teleefoon: Khadka Caawimaada Dib u celinta Washington: 1-866-789-1511 ee loogu talogalay taageerada dareenka iyo wareejinada
  Bogga internetka: https://www.dshs.wa.gov/bha

- **Dulmeerka Gobolka Washington ee Adeegaha Deg-dega ah (WISe)** barnaamij ku bixinaya adeego caafimaad hab dhaqan buuxa meelo baddan oo gobolka ka mid ah ee ay la socoto qorshe dhaqan gelin buuxa ee loogu talogalay 2018. Dulmeerka Gobolka Washington ee Adeegaha Deg-dega ah wuxuu taageerayaa dhallinta u qalma Apple Health, ee ay da'doodu tahay illaa iyo 21 sanno, kuwaas oo qabba baahooyin caafimaad hab dhaqan adag, iyo qoysaskooda.

  Bogga internetka: https://www.dshs.wa.gov/sites/default/files/CA/cp/documents/WISeCONACTS.pdf

- Wixii kusaabsan macluumaadka khuseeya Ka hortaga iyo Adeegaha, gal boggaan internetka ah: https://www.dshs.wa.gov/bha/division-behavioral-health-and-recovery/substance-abuse-prevention-and-mental-health-promotion

- Wixii kusaabsan macluumaadka khuseeya ka hortaga isticmaalka daroogada qofka yar, gal boggaan internetka ahwww.StartTalkingNow.org.

Caawimaada Baahooyinka Gaarka ah

- **Taageerada Xiliga hore ee Gobolka Washington ee loogu talogalay Dhallaanka iyo kuwa Orod baradka ah (ESIT)** waxay bixisaa adeego soo dhexgelid loogu talogalay carruurta da'doodu laga bilaabo marka ay dhashaan illaa ay ka gaaraan seddex sanno. Haddii aad daryeeshid ilmo qabba naafonimo ama qabtid wel-wel kusaabsan koritaanka ilmo, ka wac Khadka marwalba shaqeeya ee Caafimaadka Qoyska lambarkan 1-800-322-2588. Weydii magaca Iskuduwaha Xogaga Qoyska (FRC) ee jooga bulshadaada degmada si aad u oggaatid haddii uu ilmahaagu u qalmo adeegaha Taageerada Xiliga hore ee Gobolka Washington ee loogu talogalay Dhallaanka iyo kuwa Orod baradka ah.

  Teleefoon: 1-800-322-2588 (TTY 711). Bogga internetka: www.dcyf.wa.gov/services/child-dev-support-providers/esit

- **Maamulka Naafada Koriinka DSHS ee (DDA)** waxay bixisaa adeego loogu talogalay kuwa laga helay naafada koriinka ama wax garashada ama dib u dhac. Adeeguhu waxay ku tiirsanyihiin baahida iyo maalgelinta. Adeegaha waxaa kamid ah taageero qoys iyo qof, daryeel shakhsiyeed, taageerooyin shaqaalayn, barnaamijyo maalin, iyo daryeel deganaansho. Si aad ula xiriirtid xafiiskaaga Maamulka Naafada Koriinka:

  Bogga internetka: www.dshs.wa.gov/dda kadibna fiiri hoosta "Eligibility" "U qalmida"

Daryeelka Ilmaha iyo Waxbarashada Xiliga hore

Daryeel bixiyayaasha qaraabada ah waxay u qalmi karaan mid kamid ah barnaamijyada daryeelka ilmaha la kabey ee gobolka. Kuwaan waxaa kamid ah:

- **Xiriirada Shaqada Daryeelka Ilmaha (WCCC) ee loogu talogalay daryeel bixiyayaasha shaqeeya**

- **Daryeelka Ilmaha Xiliyeedka ah ee loogu talogalay shaqaalayaasha xiliya beereedka**

- **Daryeelka Ilmaha Guri la'aanta ah ee loogu talogalay qoysaska si kumeel gaar ah guri la'aan u ah (ku eg degmooyin gaar ah)**

Loogu talogalay Xiriirada Shaqada Daryeelka Ilmaha iyo Daryeelka Ilmaha Xiliyeedka ah, xaaladaha badankooda daryeel bixiyayaasha way u qalmi karaan xitaa haddii hal qof oo lammaanaha kamid ahi uu shaqaynayo. Haddii ay labuduba ka yihiin masuuliyiin sharciyaysan ilmaha oona lagu qoray dukumeentiyada maxkamada, dhammaan waa in ay yihiin kuwo shaqeeya si ay ugu qalmaan. Loogu talogalay Daryeelka Ilmaha Guri la'aanta ah, daryeel bixiyayaashu waa in aysan u qalmin barnaamij daryeel ilmo la kabay oo kale waana in ay ku lug lahaadaan hawl la oggolaaday, sida raadinta shaqo ama guryayn. Qaraabada shaqeeya oona daryeela carruur ku tiirsan-gobolka waxay sidoo kale u qalmi karaan daryeelka ilmaha la kabay waana in ay la xiriiraan shaqaalahooda bulshada.

Loogu talogalay Xiriirada Shaqada Daryeelka Ilmaha iyo Daryeelka Ilmaha Xiliyeedka ah:

Teleefoon: 1-877-501-2233 ee loogu talogalay Xarunta Adeega Macamiilka Gobolka Washington
Bogga internetka: www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/find-child-care

La xiriir Oggaanshaha Daryeelka Ilmaha wixii kusaabsan macluumaadka daryeelka ilmaha ee kale, uu kujiro Daryeelka Ilmaha Guri la'aanta ah

Teleefoon: 1-800-446-1114
Bogga internetka: http://wa.childcareaware.org/families

Amanda, Da'deedu tahay 5. Codadka Carruurta Tar-tanka 2004.

ECEAP (Barnaamijka Caawimaada iyo Waxbarashada Ilmonimada Xiliga hore) iyo Biloowga Hore waxay siiyaan adeego bilaash ah iyo taageero kuwa ay da'doodu tahay 3 illaa 4 sanno kuwaas oo qabba arimo khatar ah oo soo dhex geli kara guusha iskuulka, ay kujiraan carruurta ku jira daryeelka xigtada.

Teleefoon: 1-866-482-4325
Bogga internetka: https://www.del.wa.gov/parents-family/eceap-and-head-start

U doodida Waxbarashada

Xafiiska Waxbarashada lagu Dacwoodo (OEO) wuxuu xaliyaa cabashooyinka, muranada, iyo mushkiladaha ka dhaxeeya qoysaska iyo iskuulada dadweynaha ee kusaabsan dhammaan meelaha saamayn kara waxbarashada ardayga. Xafiiska Waxbarashada lagu Dacwoodo wuxuu u shaqeeyaa si ka madax banaan nidaamka iskuulka dadweynaha. Adeegaha waxaa helaya ardayda laga bilaabo Iskuulka xanaanada iyo heerka 12aad waana kuwo bilaash ah oona sir ah. La xiriir Xafiiska Waxbarashada lagu Dacwoodo marka aad qabtid mushkilad aan la xalin oo aad ku qabtid iskuulka dadweynaha midaas oo saamaynaysa waxbarashada ardaygaaga ama ilmahaaga; waxaad u baahantahay qiimeyn madax banaan oo xaalada lagu sameeyo; ama haddii aad qabtid su'aalo kale oo kusaabsan nidaamka waxbarashada.

Teleefoon: 1-866-297-2597
Bogga internetka: www.oeo.wa.gov

Caawimaada Cuntada

- **Barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah ee Washington** ee loogu talogalay dheefaha cuntada bilaha ah. La xiriir:

  CSO-gaaga degmada: si aad u oggaatid Xafiiskaaga Adeega Bulshada degmada wac 1-877-501-2233 ama gal boggaan internetka ah: https://www.dshs.wa.gov/esa/esa-find-office

  Si aad u oggaatid haddii aad u qalantid una codsatid caawimaada, gal boggaan internetka ah www.washingtonconnection.org

- **Barnaamijyada Nafaqada Ilmaha** - Haddii carruurta ay kasoo baxaan heerarka dakhliga dowlada ama qaataan TANF ama Cuntada Aasaasiga ah, ayagu waxay u qalmaan quraco qiimo-jaban ama bilaash ah iyo qado oo ay ku qaataan iskuulada dadweynaha iyo kuwo khaaska ah. Si aad u oggaatid inbaddan oo macluumaad ah, la xiriir iskuulka ay carruurtaadu dhigtaan.

- **Barnaamijka Cuntada Daryeelka Qofka wayn iyo Ilmaha (CACFP):** wuxuu bixinayaa cuntooyin bilaash ah oo la siiyo carruurta ku jira daryeel ururada ka qayb qaadanaya barnaamijka. Goobo baddan oo Barnaamijka Cuntada Daryeelka Qofka wayn iyo Ilmaha ah waxay bixiyaan quraco, qado, iyo cunto fudud. Qaar kamid ah iskuulada dadweynaha iyo kuwa khaaska ah waxay bixiyaan cunto fudud iyo/ama cuntooyin kadib maalinta iskuulka caadiga ah. Si aad u oggaatid macluumaad baddan, la xiriir bixiyaha daryeelka ilmaha ee jooga halka ay carruurtaadu daryeelka ugu jiraan.

- **Barnaamijyada Cuntada Xiliga Xagaaga:** Dhammaan carruurta, jira 18 sanno ama ka wayn, ayada oo aan la eegaynin dakhliga qoyska, waa kuwo uga qalma cuntooyin bilaash ah ururada bixiya cuntooyin inta lagu guda jiro bilaha xagaaga ah. Wixii kusaabsan macluumaad:

  Teleefoon: 1-866-3-GAAJO
  Bogga internetka: www.fns.usda.gov/summerfoodrocks

- **Barnaamijka Nafaqada Dumarka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)** wuxuu ku caawinayaa carruurta yar-yar ee ka yar shan sanno, dumar uur leh, iyo hooyooyinka wakhti dhow dhallay waxay wax u cunaan si wanaagsan, waxay bartaan waxa kusaabsan nafaqada, iyo in ay ahaadaan kuwo caafimaad qabba. Qaraabada iyo waalidiinta koriinka kuwaas oo ah hadda daryeel bixiyayaasha aasaasiga ah ee carruurta (da'doodu tahay 0-5) waxay heli karaan adeegaha Barnaamijka Nafaqada Dumarka, Dhallaanka iyo Carruurta ee loogu talogalay carruurta(ilmaha) daryeelkooda ku jira. Ayada oo ay jirto jeegaga bilaha ah ee aad ku iibsatid cuntada caafimaadka leh, Barnaamijka Nafaqada Dumarka, Dhallaanka iyo Carruurta wuxuu bixinayaa waxbarasho heersare ah iyo baaritaano caafimaad iyo wareejino.

- **Si aad u heshid xarunta caafimaadka Barnaamijka Nafaqada Dumarka, Dhallaanka iyo Carruurta ama u oggaatid haddii aad u qalantid:**

  Teleefoon: Khadka Marwalba shaqeeya ee Caafimaadka Qoyska: 1-800-322-2588
  Bogga internetka: http://www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/WIC/Eligibility

- **Khadka Cuntada Qoyska Gobolka oo dhan** wuxuu bixinayaa macluumaad dheeraad oo kusaabsan xogaga ama ilaha cuntada, uu kujiro barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah ee gobolka, cuntooyin xagaa bilaash ah oo carruurta loogu talogalay, bangiyo cunto degmada ah, iyo Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeralayda.

  Teleefoon: 1-888-436-6392

Taageerada Ilmaha

- Waxaad ka codsan kartaa adeegaha Qaybta Taakulaynta Imaha (DCS) xitaa haddii aadan qaadan wax caawimaad dadweyne ah. Qaadashada TANF ama qaar kamid ah noocyada caawimaada caafimaadka waxaa si ootamaatik ah ka dhallan kara in Qaybta Taakulaynta Ilmaha ay samayso kiis.

- Samaynta Qaybta Taakulaynta Ilmaha waalidnimada waxay ku caawinaysaa qoyska in uu helo dheefaha uu ilmuhu u qalmi karo sida Dammaanada Bulshada sidoo kale waxay ku caawinayaan in ay bixiyaan taariikhda caafimaad ee qoyska. Haddii aad ka cabsatid in samaynta waalidnimada ama fullinta taageerada ilmaha ay adiga khatar kuu tahay ama ilmaha, la xiriir Xafiiskaaga Adeegaha Bulshada degmada si aad uga hadashid “sababta wanaagsan" ee fullinta katanaasulka taageerada ilmaha.

- Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay fullin doontaa amarka taageero ilmo ee hadda jira, sida shahaado furitaan, ama haddii kale waxaa la samayn doonaa amar taageero haddii loo baahdo. Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay dejinaysaa waajibaadyo taageero kusalaysan awooda waalidka uu wax ku bixiyo. Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay sidoo kale isku dayaysaa in ay waalidiintu caymiyaan ilmaha ku jira caymiskooda caafimaadka, haddii la helayo.

Wixii kusaabsan dhammaan adeegaha Qaybta Taakulaynta Ilmaha:

Teleefoon: 1-800-442-CARRUURTA
Bogga internetka: www.childsupportonline.wa.gov

Qoraalo Daabacad Bilaash ah

Waxaad ka amri kartaa qoraalada daabacada leh lambarka daabacada Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada dhinaca Gobolka Washington Qaybta Daabacada Myfulfillment.wa.gov. Lambarka daabacada inta baddan wuxuu ku qoranyahay gadaashada bogga. Tusaale ahaan, qoraalkan daabacan lambarkiisu waa DSHS 22-1120. Codsashooyinka qoraalada daabacan sidoo kale waxaa la dhigi karaa:

Ii-mayl: Fulfillment@des.wa.gov
Teleefoon: 360-570-5555
Faakis: 360-664-2048

Marka aad dalbaysid qoraalada daabacan, fadlan ku dar magaca qoraalka daabacada, lambarka, magacaaga, iyo cinwaanka waddada boostada.

- **Oggolaanshaha Daryeelka Caafimaadka ee loogu talogalay Ilmaha aad Daryeeshid:** Hagaha Daryeel bixiyaha Xigtada ah (DSHS 22-1119). Wuxuu sharxayaa sharciyada laga gudbiyay 2005-2006 dhinaca Sharci dejiyaasha Gobolka WA midkaas oo sharxaya xuquuqaha qaraabada iyo masuuliyadaha. Ingiriisi, Kambodiyan, Ruushiya, Soomaali, Isbaanish, Fiitnaam (PDF)

- **Ayeeyaasha iyo awoowayaasha iyo Qaraabada Ma ogtahay Adeegaha iyo Taageerooyinka loogu talogalay Adiga iyo Carruurta aad Daryeeshid?** (DSHS 22-1120). Liis kusaabsan xogaga, dheefaha, iyo adeegaha taageero ee ay heli karaan qaraabada korinaya carruur. Ingiriisi, Kambodiyan, Shiine, Kooriyan, Laoshiyan, Ruushiya, Soomaali, Isbaanish, Fiitnaam (PDF)

- **Hagaha U doodida Waxbarasho ee loogu talogalay Daryeel bixiyayaasha – Taageerida Guusha Iskuulka ee loogu talogalay Carruurta iyo Dhallinta Daryeelka kujira** (DSHS 22-1192). Wuxuu ku caawiyaa daryeel bixiyayaasha in ay fahmaan waxa ay tahay u doodida waxbarasho iyo waxa laga filanayo ardayda laga bilaabo iskuulka xanaanada illaa dugsiga sare. Engiriisi (PDF)

- **Hagge loogu talogalay Adeegaha Taageerada Ilmaha ee Daryeel bixiyayaasha Qaraabada ah** (DSHS 22-1143) Nooca adeegaha Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS) ayaa bixin kara haddii aad daryeeshid ilmaha qaraabada ah. Engiriisi (PDF)

- **Qaraabada ah sida Waalidiinta: Hagge Xog oo loogu talogalay Qaraabada ku Korinaya Carruurta Gobolka Washington** (DSHS 22-996). Buuggyarahaan ka kooban 75 bogg waa hagge xog buuxda oo loogu talogalay daryeel bixiyayaasha qaraabada ah. Engiriisi (PDF)

- **Doorashooyin loogu talogalay Ayeeyaasha ama awoowayaasha iyo Daryeel bixiyayaasha kale ee aan waalidka ahayn: Haggid Sharci oo loogu talogalay Gobolka Washington** waa qoraal daabacad aan-ahayn DSHS ee loogu talogalay qaraabada korinaya ilmo ku lug leh xaalad sharci. Waxaa looga heli doonaa si toos ah internetka si bilaash ah halkan www.legalvoice.org (ku dhufo "Tools & Resources," "Qalabka iyo Xogaga" kadibna "Family Law" "Sharciga Qoyska"). Daabac nuqulo loogu talogalay dadka aan-qaraabada ahayn ee Codka Sharciga ah oo ah $10 (ay kujirto lacag boosto); kala xiriir Codka Sharciga halkan info@legalvoice.org ama 206-682-9552, wicitaanka fog. 102.

Xirmad macluumaad oo bilaash ah oo ay ku jirto Haggaha Sharciga Codka Sharciga ah ee loogu talogalay Gobolka WA, doorashooyin sharciyeed oo DVD ah oo ay la socoto qoraalo xiriir la leh waxaa laga codsan karaa macluumaadka xiriirka hoose ee Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida.

Su'aalooyin?

Wixii kusaabsan macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

- **Shelley Arneson:** Maamulka Carruurta/DSHS, 360-902-8109 ama shelley.arneson@dshs.wa.gov
- **Tom Berry:** Maamulka Adeegaha Dhaqaalaha/DSHS, lambarkan 360-725-4617 ama tom.berry@dshs.wa.gov
- **Jage Curl:** Maamulka Adeegaha Dhaqaalaha /DSHS, lambarkan 360-725-4589 ama jage.curl@dshs.wa.gov
- **Kevin Cornell:** Maamulka Daryeelka Caafimaadka, lambarkan 360-725-1423 ama kevin.cornell@hca.wa.gov
- **Hilarie Hauptman:** Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida/DSHS, lambarkan 800-422-3263 ama 360-725-2556, ama hilarie.hauptman@dshs.wa.gov

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

DSHS 22-1120 SM (Rev. 10/16) Somali